

Qeybta 504 Nidaamka Badbaadada

Xuquuqda Waalidka iyo Ardayga ee Aqoonsiga, Qiimeynta iyo Meeleynta

Hoos waxaa ku qoran faah-faahinta xuquuqda uu sharcigu siinayao waalidiinta iyo ardayda naafada ah. Ujeedada dukumeentigan wuxuu si buuxda ugu wargelinayaa go'aannada ku saabsan ardaygaaga iyo in lagu sheego xuquuqdaada haddii aadan ku raacsaneyn mid ka mid ah go'aannadaas. Waxaad xaq u leedahay waxyaabaha soo socda:

- * Xaq u lahaanshaha ardaygaaga naafada ah inuu ka qayb qaato, oo uu ka helo faa'iidooyinka barnaamijyada waxbarashada dadweynaha iyada oo aan lagu midab-takoorin sababta oo ah naafonimadiisa/naafanimadeeda;
- * Xaq ulahaanshaha kuhelidda dhammaan macluumaadka waalidka ama koriyaha afka hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed;
- * Xaq u lahaanshaha ardaygaagu in uu helo waxbarasho dadweyne oo bilaash ah oo kuhabboon taas oo ay ku jiraan xuquuqda ardayga si uu wax ula barto ardayda aan naafada ahayn ilaa sida ugu saraysa ee ugu habboon;
- * Xaqqa ah ardaygaagu in uu helo fursad siman si uu uga qayb-qaato barnaamijyada dugsiga iyo hawlaha ka baxsan ee dugsigu maal-geliyo;
- * Xaq u yeelashada helitaan ogaysiis waqti ku habboon ka hor intaynan degmadu aqoonsan, qiimeynta ama bedelida meeleynta ardaygaaga;
- * Xaq u lahaanshaha ah inaad kormeerto oo aad dib u eegto dhamaan diiwaanada waxbarasho ee ardaygaaga, oo ay ku jirto xaq u lahaanshaha nuqullada diiwaannada waxbarasho oo qiimo macquul ah haddii uusan kharashkaasi kaa horjoogsan inaad gasho diiwaanka, iyo xaqa aad u leedahay in aad wax ka bedesho diiwaanka haddii aad rumaysan tahay in macluumaadka ku jira diiwaanka aysan sax ahayn ama lamarin habaabiyay. Haddii dugsiga degmadu diido inuu wax ka bedelo diiwaanka, waxaad xaq u leedahay inaad codsato dhageysi;
- * Xaq u lahaanshaha qiimeynta waxbarashada iyo go'aaminta meelaynta ee lagu saleeyay macluumaadka ilo kala duwan iyo dadka garanaya baahida ardayga, macnaha xogta qiimeynta, iyo fursadaha meelaynta;
- * Xaq u lahaanshaha muddada dib-u-qiimeynta iyo qiimeynta ka hor inta aan lagu samaynin wax bedel ah oo muuqda meeleynta; iyo
- * Xuquuqda dhageysi dhexdhexaad ah haddii aadan ku raacsaneyn tallaabada ay degmadu soo jeedisay. Waxaad noqon doontaa kaqeyb-gale firfircoon. Waxaad xaq u leedahay inaad heshid difaac qareen nidaamka dhegeysiga dhexdhexaad ah. Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadata go'aanka dhexdhexaadka ah ee dhageysiga xaakinka.

Fadlan Hayso Buuggan Tixraaca Tilmaamaha mustaqbalka